

Waydiin suaalo joogta ah oo ku saabsan ilaaliyaha

Frequently Asked Questions about Guardianship

Daabacaada MAGIC: Waa hay-ad la socota isbedelada go aan sameeynta.

Waa maxay ilaaliye ama haye (What is a guardian?)

Waa qof ay maxkamad awood loosiisay inuu u sameeyo go aan qof aan go aan sameeynkarin Qofka leh (guardian) qof masuulka ah waxaa ladhahaa (ward). Guardian ama qofka masuulka kaa ah waxaa maga caawa maxkamada hadii uu qofku maskaxda looga jiro, go aan gaari Karin, ama fudud, aan raadsanayn daawo, meel uu kunoolaado. Intii ay maxkamadu go aan gaarin arimahaan oodhan ayay fiirisaa.

Qofka masuulka ah (Guardian) waa go aan gaare, hogaamiye, iyo la taliye, isgoo eegaya danta qofka loo adeegayo. U adeeguhu waa inuusan dhexgalin familiga.

Yaa noqonkara Ilaaliye (Who can serve as a guardian?)

Maxkamada ayaa goamisa qofka noqondoona ilaaliye inkastoo la eegayo danta guud qofka la ilaalinaayo. Waxuu noqonkaraa qofka ehelkiisa, saaxiib, dad ku takhasusay arimahaan, hay adaha dadka taakuleeya, iyo iwm. Qofkaasna waxaa laga eegayaa taariikhdiisa inuu horey dambiyo uu geeystay iyo inkale.

Waa maxay shaqada ilaaliyaha?

Kan ma suulka lagayahay ayay kuxirantahay haduu dharsiinayo, haduu gurigiisa soo seexinaayo, haduu dhahaayo daawada side u qaataa, maxkamadu shuqul kuma laha arintaas, sidoo kale hanti ilaaliyaha maxkamadu shuqul kuma leha siduu lacagta u maamulo maadaama uu raali ka yahay qofka uu u shaqeeyo.

Sidee qofk masuul ah u helikartaa?

Qofkii xiiseenaya arintaan, sida qofka ehelkiisa ama saaxiibadiis baa maxkamada waydiinaysaa qofkay rabaan inuu ka masuul noqdo qofka la ilaalinaayo. Maxkamada ayaadhagaysanaysa. Maxkamadana waxay siinaysaa wakhti ay labadaqof uga fekeraan arintaan intaysan ku dhaqaaqin. Maxkamadaana u magacaabaysa looyar. Marka ay maxkamadu dhagaysanayso waa inlahayaa cadeen sheegaysa inuu qofkaan u baahanyahay inlahayo ama masuul laganoqdo.

Yaa bixinaaya lacagta ku baxaysa ilaalinta?

Maxkamada, looyarka iyo waxii qarash ah oodhan waxaa bixinaaya qofka la ilaalinaayo. Laakiin qofkaas haduusan haysan waxlacag ah, waxaa laga yaabaa inay bixiso magaalada uudeganyahay.

Ilaalin nooc ee ah ayuu helaa qofka la ilaalinaayo?

Maxkamada ayaa kor kalasocota, kan ilaaliya sanadwalba waxuu soogudbinaayaa duruufaha uu ladersay sanadkii la soodhaafay. Maxkamadana talaabo ka qaadaysa haduu ku xadgudbo sharciga. Hadii aad aragto wax isdabamarin dacwo waad ka qorikartaa.

Xalkale miyaa jira oo ilaalin ah

Ilaalintu waa xalka ugu dambeeya, waxaa kafudud awooda caafimaadka, looyarka, ehelkaaga ama saaxiibadaa oosi kuu caawiya

Raadi qof xirfad fiican u leh sharciyada iyo talooyinka

Minnesota Association for Guardianship and Conservatorship (MAGIC) waxay ku siinaysaa warbixin guud. Warqadahaan ha u isticmaalin talo sharci, laa kiin hadii aad u baahato Abuukaate, talo anaga si toos ah noogula soo xiriir si aanu u xalino dhibaatooyinkaaga.

Minnesota Association for Guardianship & Conservatorship

P. O. BOX 14246 ST. Paul, MN 55114.

(652) 292-9131

www.minnesotaguardianship.org